



Xuquuqda daryeelka caafimaadka

Rätt till vård



Macluumaad ku socda dadka magan gelyo/sharci
dalbaday iyo shaqsiyada jooga Iswidhan ee bilaa
sharciga ah.

Information för asylsökande och personer som är i
Sverige utan tillstånd.




Caruurta ka yar 18 jir waxay xaq u leeyihiin daryeel caafimaad iyo daryeelka ilkaha sida caruuraha kale oo dhan ee Iswidhan ku nool.

Barn under 18 år har rätt till hälso- och sjukvård och tandvård på samma sätt som alla andra barn som bor i Sverige.



Dadka waaweyn waxay xaq u leeyihiin daryeelka caafimaadka ee degdega ah ama daryeel caafimaad oo uu dhakhtarka, ama dhakhtarka ilkaha ama masuuliyiin kale oo ka socda shaqaale caafimaad ay go'aamiyeen inaan la sugi karin. Tusaale ahaan waa daryeelka caafimaadka ee ka hortagaya in uusan qofka xanuunkiisa kasii darin oo ku noqon xanuuno khatar ah ama daryeel u baahan in lasii raad raaco.

Vuxna har rätt till akut vård och vård som läkaren, tandläkaren eller annan ansvarig vårdpersonal bedömer inte kan vänta. Till exempel vård som kan förhindra mer allvarliga sjukdomar eller vård som behöver följas upp.



Daryeelka caafimaadka ee aan la sugi karin waxaa kaloo ka mid ah qalabka caawinta hadii ay kugu adag tahay inaad ka baxdo hawsha nolosha iyo dhaqdhaqaaqa maalinta. Tusaale ahaan waxay noqon kartaa kursiga qofka naafada ku socdo ama qalab u fududeeya siduu dadka ula hadli/xidhiidhi lahaa.

Vård som inte kan vänta kan också vara behov av hjälpmedel om du har svårt att klara av vardagliga saker. Det kan till exempel vara en rullstol eller hjälp att kommunicera.



Waxaad xaq u leedahay la talin ah ka hortaga dhalmaada iyo in lagu siiyo fekrado ku saabsan wixii adiga kugu haboon. Waxaad kale oo ka iibsana kartaa cinjirada(kondom) farmasiga ama dukaamada cuntada gada.

Du har rätt till rådgivning om preventivmedel och att få förslag på den sort som passar bäst. Du kan också köpa kondomer på ett apotek eller i en mataffär.



Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad markaad uurka leedahay, marka aad foolanaysid iyo ka dib marka uu ilmuhu dhasho. Waxaad kaloo xaq u leedahay daryeel caafimaad hadii aad ilmaha iska soo saartid iyo in lagu siiyo taageero hadal. Adiga ayaa go'aanka iska leh hadii aad rabtid inaad ilmaha iska soo saartid iyo inkale ilaa inta uurku gaadhayo 18 wiig/usbuuc.

Du har rätt till vård när du är gravid, under förlossning och efter att barnet är fött. Du har också rätt till vård vid abort och att få samtalsstöd. Du kan själv bestämma om du vill göra abort fram till vecka 18.



Waxaad kale oo xaq u leedahay baadhitaan caafimaad oo bilaash ah. Dadka magan gelyo/sharci dalbaday waxaa loo soo diryaa balan ah baadhitaan. Dadka Iswidhan jooga ee bilaa sharciga ah waxaa la siinayaa fursad/balan marka ay yagu iskood u raadsadaan daryeel caafimaad.

Du har också rätt till en gratis hälsoundersökning. Asylsökande får en kallelse till undersökningen. Personer som är i Sverige utan tillstånd får ett erbjudande först när de själva söker vård.



Kuli dadka aan ku hadlin luqda Iswidhishka waxay xaq u leeyihiin turjubaan. Noo sheeg inaad u baahan tahay turjubaan markaad wakhti qabsanaysid. Shaqaalaha ayaa turjubaan kuu qabanaya. Ma aha in caruurta ama qaraabadu kuu turjumaan.

Alla som inte kan svenska har rätt till tolk. Berätta att du behöver tolk när du bokar tid. Personalen bokar en tolk åt dig. Barn och släktingar ska inte tolka.



Shaqaalaha caafimaadka daryeelka iyo turjubaanadu sirta qofka ma gudbin karaan. Ma sii gudbin karaan war adiga kugu saabsan hadii aysan amar adiga kaa qaadan. Waxaad sheegtid ma saamayn doonto dalbashadaada magan gelyada/ sharciga

Vårdpersonal och tolkar har tystnadsplikt. De får inte berätta något om dig utan att du har godkänt det. Det du säger kommer inte att påverka din ansökan om asyl.




Markaad raadsanaysid daryeel caafimaad waxaad tustaa kaadhkaaga LMA iyo rasiidhka cadaynaya inaad sharci dalbatay. Hadii aad Iswidhan ku joogtid bilaa sharci waxaad isticmaali kartaa baasaboora ajinabi ah si aad aqoonsigaaga u xaqiijisid.

När du söker vård ska du visa ditt LMA-kort eller kvitto på att du har sökt asyl. Du som är i Sverige utan tillstånd kan använda ett utländskt pass för att identifiera dig.

- C0231
- K8713
- M3112

Marka ugu horaysa ee aad dalbatid daryeel caafimaad waxaa lagu siinayaa nambarka ku meel gaadh ah. Xafidso nambarkaas oo soo qaado markasta oo aad daryeel caafimaad raadsanaysid. Shaqaaluhu waxay isticmaalayaan nambarkaas ku meelgaadhka ah si ay u arkaan in mar hore daryeel caafimaad lagu siiyey.

Första gången du söker vård får du ett reservnummer. Du ska spara numret och ta med det varje gång du söker vård. Personalen använder reservnumret för att se om du fått vård tidigare.



För info om symbollicenser: <http://www.dart-gbg.org/licenser>
Detta bildstöd är skapat via www.bildstod.se i samarbete med berörda verksamheter inom Västra Götalandsregionen.

www.kom-hit.se/flykting



Flykting



VÄSTRA
GÖTALANDSREGIONEN